



Kaalintaada iyo kumbiyuuterka – SOMIT >>> Baro Afsoomali

Sheeko xariirtu waa aasaaska waxbarashada carruurta Soomaaliyeed

Badownimo reer magaal

Casharka Barashada afsoomaliga



In da'yar oo magaal ku koray aya beri gu' barwaaqo ah miyi u fasax tagey reer ay ehel yihiin. Maalmo yar markuu joogey ayaa maalin lo sil saaray in uu ariga raaco. Wuxuu arigii la socdaba waxaa la gaarey waqtiga qorraxdu aad uu kululaato ee xooluhu harsadaan. Arigii

baa geedo bar-galay. Arigu wuxuu isugu jirey ido iyo riyo. Ninku wuxuu arkay idihii oo wada raabsanaya iyo riyihii oo intay geed weyn hooskiis ku aruureen orgi qooqani ku qalaadayo, taas oo ahayd amour ku cusub inankaas reer magaalka ah.

Halkii ayuu arigii uga dhaqaaqay. Gurigii buu tagey si uu cunto iyo biyo u helo. Dadkii guriga joogey markay arkeen ninkii ariga lagu hallaynayey oo keligii socda ayay intay naxeen la soo boodeen “ War aaway arigii?” Markaasii si qabow wuxu ugu jawaabey iyo xaddiis kula dhex meeraysanayey, wayna wada marwaansanaayeen!”

Wixii faahfaahin kala xiriir webmasterka